



## Nidaamka Xalinta Cabashada

Sida waafaqsan Xeerka Guddiga 4.50.032-P, jiheyntaan maamulka waxay dajisaa habraac gaar ah ee loogu talloagalay cabashooyinka rasmiga ah ee ardayda, waaladiinta/masuulada iyo dadka dagan Degmada (“cowdaha”). Xeerka Guddiga iyo jiheynta maamulka wax kama qabtaan cabashooyinka la xiriiro goobta shaqada ee ay gudbiyeen shaqaalaha PPS, taasoo aheyd in loo gudbiyo kormeeraha shaqaalaha, ee hogaan kaloo Degmada ah, ama waaxda Shaqaalaha Degmada, waxay ku xirantahay daruufaha.

Degmada waxaa ka go'an inay ku xaliso cabashooyinka rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga aheyn qaab cadaalad ah oo waqtiga ku haboon iyadoo loo marayo nidaam dhinacyadoo dhan, oo ay ku jiraan qoysaska midabka leh iyo bulshooyinka kale ee aan matalaada laheyn, ay ku helayaan fursad ay ku soo bandhigaan aragtidooda oo lagula dhaqmo si ixtiraam oo sharaf leh.

Nidaamka cabashada rasmiga ah waa mid ka mid ah aaladaha loo heli karo in lagu xaliyo dhibaatooyinka iyo arimaha kale ee dugsiga ku saleysan. Degmada waxay ku talo jirtaa in dadaal walba ee loo sameeyo in lagu xaliyo qilaafaadka iyadoo loo marayo nidaamyo aan rasmi aheyn waxaa lagu qeexay hoos.

- I. Cabashooyinka aan rasmiga aheyn - DHIBAATO XALINTA KU SALEYSAN DUGSIGA/WAAXDA Fasalada, dugsiyada, iyo waaxaha, shaqaalaheena, waaladiinta iyo ardayda waxay si joogto ah uga wada shaqeynayaan xalinta arimaha iyo wanaajiyaan nidaamyadeena loogu abuurto ardayda waaya
  - A. Cowdaha waxaa lagu dhiirogelinayaa inuu marka koowaad si toos ah ula hadlo macalinka ama qofka shaqaalaha ee ku lugleh.
  - B. Haddii walaaca aan lagu xalin isgaarsiin toos ah, cowdaha waxaa lagu dhiirogelinayaa inuu la hadlo maamulaha dugsiga. Maamulayaasha waxaa laga filanayaa inay si degdeg ah uga jawaabaan cabashooyinka, kuwaasoo ka mid noqon karo shirka qof ahaanta haddii uu codsado dhinac walboo ku lugleh. Haddii walaaca aan lagu xalin ku qanacsanaanta cowdaha ama cowdaha uusan rabin inuu ka qeybgalo xalka aan rasmiga aheyn, waxay u soo gudbin karaan



## Nidaamka Xalinta Cabashada

cabasho rasmi ah Xiriiriyaha Adeegyada Cabashada

degmada. Haddii walaaca uu la xiriiro waaxda degmada:

- (1) Cowdaha waxaa lagu dhiirogelinayaa inuu marka koowaad si toos ah ula hadlo qofka shaqaalaha ee ku lugleh.
- (2) Haddii walaaca aan lagu xalin isgaarsiin toos ah, cowdaha waxaa lagu dhiirogelinayaa inuu la hadlo kormeeraha qofka shaqaalaha ah. Kormeerayaasha waxaa laga filanayaa inay si degdeg ah uga jawaabaan cabashooyinka, kuwaasoo ka mid noqon karo shirka qof ahaanta haddii la codsado. Haddii cowdaha uusan hubin qofka kormeeraha ku haboon ah, cowdaha wuxuu caawin kala xiriiri karaa Xiriiriyaha Degmada iyo Qoyska. Haddii walaaca aan lagu xalin ku qanacsanaanta cowdaha ama cowdaha uusan rabin inuu ka qeybgalo xalka aan rasmiga aheyn, waxay u soo gudbin karaan cabasho.

### II. Xiriiriyaha Degmada iyo Qoyska

Xiriiriyaha Degmada iyo Qoyska wuxuu u shaqeeyaa sida marinka u dhexeeya qoysaska iyo shaqaalaha dugsiga si ay uga caawiyaan xalinta wal (y)-119 Td [(i)2Ga-uc0woo kb do skXi1 (aaw).



Jiheynta Maamulka

~~450-001-AD~~

Nidaamka Xalinta Cabashada

IV. QODOB2 Tc 01 tE(t) (R)JT0 (A)T0 (AD )JT0 (A)20 (H Tc 0 Tw 1.22 0 2Td ( )Tj EMC /Span <LB